

Cudurka dabaysha

Waa maxay cudurka dabayshu?

Cudurka dabayshu waa fayras keena qandho, matag iyo murqo jawrar. Haddii neerfaha waxyeelo gaarto wuxuu sababi karaa baralaati abadiyan ah - taasoo ah luminta isticmaalka murqaha. Cudurka dabaysha ayaa sidoo kale baralaati ka dhici kara murqaha neefsiga iyo wax liqida, taasoo keenaysa dhimasho.

Sidee ayuu cudurka dabayshu ugu dhacaa dadka?

Waa cudur aad u caabuq badan kaasoo badanaa ku faafa taabahada qofka cudurka qaba. Fayraska dabaysha ayaa ku nool dhuunta iyo hunguriga. Fayraska ayaa laga helaa hunguriga wuxuuna ku faafaa saxarada (waxyaabaha dabada ka yimaada) ee qofka caabuqa qaba. Fayraska ayaa faafi kara sabab la xiriirta nadaafad darada farxalka ama biyaha oo fayrasku gaaro.

Fayraska ku jira dhuunta qofka jiran ayaa sidoo kale ku faafi kara calyada.

Waa maxay astaamaha cudurka dabayshu?

Caabuqa dabaysha ayaa keeni kara xanuun fudud ama xanuun aad u xun. Dadka qaar ayaa laga yaabaa inaysan lahayn wax astaamo ah ama waxay qabi karaan madax xanuun, caajis guud, ama waxay lahaan karaan qandho. Dadka qaar ayaa qabi kara xanuuno xun sida meningitis (kaasoo xididada maskaxdu ay dhaawac noqdaan) ama baralays (markaas oo ay murqahoodu hawl gab noqdaan) haddii caabuqu uu gaaro nidaamka dhexe ee neerfaha. Mararka ugu xun murqaha loo adeegsado neefsiga ayaa baralaati noqon kara, taasoo keenaysa dhimasho.

Dadka qaata talaalka

- 1 kamid ah 100 qof ayaa noqonaaya baralaati.
- 1 kamid ah 10 bukaan oo baralaati noqda ayaa dhimanaaya.
- 1 kamid ah 2 qof ee baralaati noqda kana badbaada geerida ayaa baralaati ahaanaaya waligood.

Yay tahay inuu qaato talaalka Cudurka dabaysha?

Cudurka dabaysha waxaa looga hortagaa talaal.

Talaalka dabaysha ayaa la siiyaa dhammaan carruurta ayadoo qayb ka ah 6 talaal oo ku wada jira 1 talaal markay jiraan 2, 4 iyo 6 bilood jir. Talaalka 6 ku jirta 1 ka talaal ayaa ka hortaga gawracatada, Cagaarshoowga B, Hib ((haemophilus influenzae b), Jix-dheerta (Xiiqda) Dabaysha iyo Teetanada.

Kuurada talaalka oo xoojin ah ayaa la siiyaa ilmaha markay gaaraan 4-5 sano ([4 talaal ee ku wada jirta 1 talaal](#)) kaasoo kahortaga Gawracatada, Jix-dheerta (Xiiqda), Dabaysha iyo Teetanada.

Haddii cunugaagu u baahan yahay talaal, ama aadan hubin xaalada talaalka cunugaaga, la xiriir GP gaaga si uu talo uu kuu siiyo

Yay tahay inuusan qaadan talaalka dabaysha?

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka cudurka dabaysha. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka.

Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka dabaysha?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa barastamool ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inaan cunugaagu aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood.

Ciladaha daran ayaa aad dhif u ah.

Sidee talaalka Cudurka dabayshu u shaqeeyaa?

Talaalka ayaa u sahla nidaamka difaaca jirka inuu dhiso difaac ka dhan ah dabaysha. Ilmaha yaryar ayaa u baahan sadex kuuro oo talaalka ah si ay u helaan difaac.

Waa sidee waxtarka talaalka dabayshu?

99% kamid ah carruurta ayaa yeesha difaac ka dhan ah cudurka dabaysha marka ay dhamaystaan jadwalkooda talaalka loo qoondeeyay.

Ma jiraan wali dad laga helay cudurka dabaysha?

Intii lagu jiray 2022, nin aan qabin talaalka oo ku nool New York, ayaa baralaati la noqday caabuqa dabaysha awgiis.

Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

Polio

HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie